



Barnaamujka fanniga leh

SOMALISKA

Barnaamujka fanniga leh waa barnaamuj waxbarashada sare diyaarin u ah oo lagu qaadanaayo shahaado waxbarashada sare diyaarin u ah.

Barnaamujka fanniga leh wuxuu ku habboonyahay qofkii rabo in uu ka shaqeeyo waxyaabaha farshaxanka ah, la xidhiidho aadaamaha iyo maadooyinka cilmiga barashada mujtamaca.

Waxbarashadu waxa ay aasaas u tahay waxbarasho dambe oo jaamacadda lagu aranayo maadooyin fanni leh, la xidhiidho aadaamiga iyo maadooyinka cilmiga barashada mujtamaca.

SHAN JIHO OO KALA DUWAN

Masawirka iyo qaab u sameynta

- Waxaad baraneysa farsamaha lagu soo saaro masawirada. Waxaad horumarineysaa awoodaada aad wax cabbireysid iyo arag ahaan in aad u xiriirtid, iyo sido kale in aad aragtid, turjuntid iyo ku fikirtid marka dhinacyo kala duwan laga eego arrin.

Qoob ka ciyaar

- Waxaad wax ka baraneysaa qoob ka ciyaaridda farshaxanka masraxa. Waxaad horumarineysaa awoodaada qaab u sameynta iyo isgaadhsiinta adiga oo qoob ka ciyaaridda adeegsanayo. Waxaad baraneysaa xiriirka u dhaxeeyo farshamaha qoob ka ciyaarka, qaab u sameynta, meherada masraxa iyo habka dhinacyo kala duwan looga eego qoob ka ciyaarka.

Fanni iyo qalabka warfaafinta

- Waxaad wax ka baraneysaa qalabka warfaafinta oo lambaraha leh. Waxaad horumarineysaa awoodaada ku xiriirtid qalabka lambaraha leh oo sameecadda, masawirada iyo sheekeysiga oo dhexda taagan. Waxaad arkeysaa, turjumeysaa iyo dhinacyo badan uga fikireysaa oraaqda lambarada leh.

Muusig

- Waxaad wax ka baraneysaa muusiga ka yimid waqtiyo kala duwan iyo dhaqano kala duwan. Waxaad horumarineysaa isticmaalidaada muusiga, abuurida waxyaabaha farshaxanka ah iyo awoodaada aad dhinacyo kala duwan uga arkeysid muusigada iyo turjubaanida musigada.

Riwaayad

- Waxaad wax ka baraneysaa riwaayadda. Waxaad horumarineysaa awoodaada qaab u sameynta hab masrax ah, xiriirinta, arkidda iyo turjumidda dhinacyo kala duwan ardayda kula dhigata iyo dadka xirfadda u leh.

Waxaan baad barnaamujka ku baran doontaa

Waxaad horumarin doontaa cilmiga aad ka leedahay hababka oraahda ee fanniga ah. Waxaad wax ka baran doontaa aadaamiga, taariikhda iyo dunida oo dhinacyo kala duwan laga fiiriyo. Waxaad wax ka shaqeyndoontaa wax abuurida, wax eegidda iyo turjumidda farshaxanka iyo dhaqanka iyo in aad tabobartid farso gacmeedka fanniga ah.

Waxbarashada waxaa ahmiyadda la saarayaa wax cusub soo saaridda, fuduulinnimo, isgaadhsiin, wada shaqeyn, keligaa wax soo saarid iyo soo bandhigid.

Habkaan buu barnaamujku u diyaarsanyahay

Barnaamujka fanniga leh maadooyinka wadajirka u ah dugsiga sare waa: ingiriis, taariikh, ciyaaraha- iyo caafimaadka, xisaabta, cilmiga sayniska, diinta, cilmiga barashada mujtamaca, iswiidhishka ama iswiidhishka oo luuqad labad ah. Barnaamujyaasha oo diyaarinta u ah waxbarashada sare waxaad ku akhrisan doontaa koorsooyin badan oo cilmi dhegood ah oo aanan lagu akhrisan barnaamujyaasha xirfadeed.

Maadooyinka sifooyinka wadajirka loo leeyahay ee barnaamijka waa: isgaadhsiinta fanniga leh iyo farshaxan iyo dhaqan.

Waxaad fursad u helaysaa in aad ku takhasustid oo aad cilmi dheeraad ah u yeelatid barnaamijka. Waxaa taas la dhahaa si qoto dheer ah barnaamijka loo galo. Kuwaasi waxay ahaan karaan maadooyin oo tusaale ahaan ah: farshaxanka dhismaha, golo ciyaareed, aqshad, abuuridda waxyaabaha lambaraha leh, filin- iyo tv-soo saaridda, cimiga faylosofiga, xisaabta, qalabka isgaadhsiinta, aragtida muusigada, cilmiga nafsiga, cilmiga barashada mujtamaca, riwaayad, tababarka och farsamaha bogga internetka. Iskoolka ka wareyso maadooyinka si qoto dheer ah loo sii galayo oo ay soo bandhigayaan.

Sidoo kale waxaad leedahay doorasho gaar ahaaneed oo aad dooran kartid waxa aad akhrisaneysid. Iskoolka weydii koorsooyinka ay heystaan.

Habka shaqada

Barnaamujka waxaad is gaadhsiindoontaa fikrado iyo ra'yi adiga oo adeegsanayo qalabyo fanni leh. Waxaad ka wada xaajoondoontaa shaqadaada iyo dadka kale shaqadoodaba, sidoo kale waxaad horumarindoontaa fahamka aad ka qabtid tayada iyo isgaadhsiinta. Waxaad la shaqeyn doontaa qeybafka kale oo maadooyinka fanniga leh iyo cilmiga dhaqanka, taariikhda, luuqadda, horumarinta farsamaha iyo isgaadhsiinta. Waxaad baraneysaa in aad mas'uuliyad ka qaadid shaqadaada iyo qiimeynta warbixin.

Shaqada dugsiga sare

Dhamaadka barnaamujka fanniga leh waxaad sameyn doontaa shaqada dugsiga sare. Halkaas waxaad ka qorsheyneysaa, waad gudagaleysaa, sidoo kalena waad qiimeyneysaa shaqo weyn oo ka ambaqaadmeeyso maadooyin aqoon oo muhiim ah oo ka mid ah barnaamujka.

Arrin in lagu fikiro u baahan

Haddii aad rabtid u qalimid khaas ah oo mid ka mid ah waxbarashada jaamacadda waa in aad qorsheysatid daraasooyinkaada. Waa ay ficantahay in lala hadlo macallinka xirfadaha- iyo waxbarashada, haddii aad rabtid in aad jaamacad aadid.

Markasta waxaad xaq u leedahay, doorashada gaarka ah dhexdeeda, in aad dooratid koorso sii dheer oo ciyaaraha- iyo caafimaadka ah iyo koorso fanni leh.